

## **Warqad wireline ah oo ku socota waalidiinta ka socota Sandesundsveien**

Waxaan soo marnay maalmo aan caadi aheyn, ka dib markii la go'aamiyey in laxeero iskoolada iyo xanaanoyinka caruurta Norway. Tas waxey noo sheegeysaa halista caabuqa/koronasmitte, waa in aan si dheeraad ah uga taxadirna caruurteena iyo dadka waaweynba, waa in aan qaadana sharciyada iyo aqbaaraha dooladu na siisayo. Waxaan idin xasuusineynaa sharciga uqaaska ah sida loga hortagilahaa taasoo qofkasta masuul ka yahay in la sameeyo.

Taas waxaa ka mid ah in la kala fagaado, gacmaha si wanaagsan loo nadiifiyo, ku qufaca warqad ama kilkisha, hooateeda iyo in la iska ilaaliyo salaanta gacanta iyo in ay san isku imaatinka dad badan.

Waxaa la idin kula talinaaya in aad la socotiin aqbaaraha ka imaanaya Folkehelseinstituttet [www.fhi.no](http://www.fhi.no)

Iyo Sarpsborg kommune nettside iyo Facebook [www.sarpsborg.com](http://www.sarpsborg.com)

Ardayada iyo macalimiinta Sandesundsveien waxey si fiican u bilaabeen waxbarashada digital ah iyo iskool guriyeed. Midaas waa wax nugu cusub iskool ahaan iyo adinka walaadiinta. Hadda waa bilaawney, waxay noqon doontaa wax barasho joogta ah maalin walba oo waqti u go'an leh.

Markaas hooshu way fududaan doontaa. Xalinta digitalka way adkaan kartaa. Wanaa dareenay bilawgii. Waqti xaadirkaan iskoolada dhan oo Norway iyo wadamo kale, waxay heestaan guri iskooled, middaas waxay keeni kartaa waxyaabaha digitalka ah ee wax loogu barto, in aysan awood kufilan aysan laheyn oo mararka qaarkood ay is is taagan. Waa inaaddamisaa oo markale soo daartaa. Waxaan sameynay siyaabo kala duwan oo looga shaqeenkaro guri iskooledka, si ay hooshu ugu fududaato sikasta uu digitaalku u shaqeyneeynin Wadashaqeyn ayaan si wanaagsan ugu wada xalineynaa. Macalimiinta iskoolka waa diyaar, waxey samaynaayan waxbarasho maalin walba ah, kasoo wanaagsana doona.

Waalidka waxaa la idiin dhibayaa shaqo mihiim ah oo inta awoodiisa ah iskoolku idanka caawinaayo sida ugu wannagsan. Waa ii mihiim in aan cadeeyo in aysan dhib weyn jirin, oo aan is dajino si aan caruurta u walwalin. Hadii ay dhacdo in hoowsha guriskooledku sidi la rabay inuu u shaqeyn wayo, aqbaar sii macalimiinta ama skolka si aan xal u wada qaarno.

Rabitaan ka socoda maamulaha iskoolka/rektor ku socota waalidiinta waqtiyada soo socoda:

- Ardayda waa in ay ka qayb galaan guri skooleedka xiliga lugu balamay, sababtu waxay tahay xiligaas waa in aan loo isiticmaalin IPadka waxyaabo kale oo ka baxsan iskoolka. Waalidiinta iyo ardayda aan soo galin IPadka xiliga guriskuleedka, waxaa la soo xariiri doona macaliinka.
- Iskoolka wuxuu isticmaala Teams/gruup galaasiyada 5 aad, 6 aad oyo 7 aad. Waxay ka helaayan macalimiinta talasiin, iyo caawin, taas oo ardayda iyo walidiinta mihiim u ah. Waxaa sido kale mihiim noo ah in aad naga caawisan meshaas ardayda iyo macalimiinto isku weydaarsanayaan waxbarashada waxaa isiticmaali kara ardayda kali ya.
- Waalidiinta waa iney aqriyaan aqbaaraha iskoolku soo bandhigayo Showbiega iyo OneNoteka.
- Waalidiinta adinka aa masuul ka ah isticmaalka skole-IPadka kadib markuu dhamaado guriskooledka. Waxaan idinku la talin lahaa in aad ka qaadaan skole-IPadka xilli maalintii si ay caruurta u sameeyaan waxyaalo kale. Waxaan jeclaanlaha skole-IPadka inuu heysto xilli isticmaalkiisa la joojiyo kl. 19:00 caruurta galaaska 1 aad ilaa galaaska 3 aad iyo caruurta galaaska 4 aad ilaa 7 aad 20:00. Ardayda waa in aysan helin skole-IPadka habeenkii.

Waxaan ku soo gabagabeynaaya aad ayey mihiim u tahay in aad is ilaalisaan adinka iyo intii idin dhow ba. La so xariira macalimiinta ama iskoolka hadii ay wax walwal ah jiraan ama aad su aal qabtiin. Xiligaan hadda ah wax ka mihiimsan ma jiran in aan ilaalino caafimaadkeena.

Sarpsborg den 18. Mars 2020

Rektor, Knut Råknerud Olsen.